جماعة الصادعون بالحق

# HORDHAC

# Shuruux

# معالم في الطريق

Sh. Mustafa Kaamil Muxammad

Kitaabkan waxaa iska leh Jamaacada Al-Saadicuun Bil-Xaq

Xuquuqda daabicidda iyo fidinta waxay u dhowrantahay jamaacada

Waa la faafin karaa qoraalka, iyada oo xigasho la samaynayo,
waxbana aan laga baddalaynin

# Tusmada Cutubka

Haadaan Qarkeed ........ 1
Kaalinta badbaadineed ee Rususha ........ 2
Jaahilyadda casrigan ........ 3
Ahmiyadda Qiyamka ........ 5
Qaab-fekerka reer Yurub iyo kaalinta Yuhuudda ........ 7
Arradnaanta ilbaxnimada reer Galbeedka ........ 11
Islaamka dhabta ah ayaa mudan hoggaaminta ........ 11
Sidee buu Islaaamku u gudan karaa kaalintiisa? ........ 12
Marin habowgii “Caalamka Islaamka” ........ 13
Waa lama huraan dib u soo nooleynta Islaamka ........ 15
Maxay ummaddani ku mudan hoggaaminta Aadanaha? ........ 16
Hawsha ugu horreysa ee dib usoo noolaynta Islaamka ........ 17
Goobtee laga bilaabaa? ........ 19
Tusmooyinka dhabbaha dib u soo nooleynta Islaamka ........ 20

# Hordhac[1]

Allaah ayaa mahad iska leh, nabad iyo naxariisna Rasuulka Allaah dushiisa ha ahaato, ehelkiisa, asaxaabtiisa iyo intii raacday oo rumaysay ilaa qiyaamaha.

Marka aan soo bandhigeyno hordhaca kitaabka "Macaalim fiddariiq" (Tusmooyinka Dhabbaha), waxaan arkeynaa in qoraagu - Allaah kheyr ha ku abaalmariyee - uu ka hadlay xaqiiqooyin waaweyn iyo mawduucyo kala geddisan, si uu noogu caddeeyo in ay yihiin tusmooyinkaas kuwo muhiim ah oo aan laga maarmin.

Qoraagu wuxuu ku bilaabayaa kitaabkiisa -gaar ahaan hordhaca - nolosha dhabta ah oo ay ku nool yihiin aadanahu, taas oo uu u tilmaamayo si xeel dheer, una caddeynayo sababaha keenay iyo natiijadii ka dhalatay, wuxuu kaloo xaddidayaa nooca daawada ee loo baahan yahay iyo siyaabihii lagu gaari lahaa.

Qoraagu wuxuu soo bandhigayaa qodobadan isaga oo isku kalsoon, hubana (yaqiinsan) waxa uu ka hadlaayo iyo cidda uu la hadlaayo, ha noqdaan hoggaamiyayaasha ama kuwa kale. Wuxuu la hadlayaa dadka oo dhan, jaahiliyada oo idil. Wuxuu la hadlayaa isaga oo ay ka muuqato isku kalsoonidii lagu yaqaanay nabiyada marka ay la hadlayaan qoomamkooda ayaga oo meel sare kala hadlaya, soona bandhigaya xaqa, kana ambaqaadaya yaqiin iyo kalsooni ay xaqa ku qabaan; yaqiin ay ka dheregsan yihiin, qofka ka dhegaysanayaana uu dareemayo inuu rasuulku waxuu hubo oo yaqiinsan yahay sheegayo, iyadoona lagu dheehay naxariis iyo turid loo dirayo dadka dariiqa ka leexday, wax shaki ahna uusan rasuulku ka qabin, wuxuu wax ugu sheegayana waa inay qaataan ama iska diidaan oo kaliya ee ma aha wax hubin dambe u baahan. Qoraagu asaga oo aysan ka muuqan wax shaki ah buu soo gudbinyaa si ay ciddii doonto u qaadato, ciddii aan rabinna uga tagto.

Hordhacaan si bilicsan ayuu wax u soo bandhigayaa, waxaana ka muuqata kalsooni iyo yaqiin sare, wuxuu kaloo gaar la yahay in uu afjigayoaadanaha nooc kasta ha ahaado, awoodduu doona ha yeeshee, taas oo akhristuhu ka fahmayo in qoraagu soo wado tusmooyin laga rabo in uu caddeeyo mawqifka uu ka joogo.

Kitaabkaan wuxuu la gaar yahay in uu ku qasbayo akhristaha in uu caddeysto mawqifkiisa, diidmo ama oggolaansho middood, sidaa awgeed kitaabku wuxuu marka koowaad foodda darayaa jaahiliyadda asaga oou tilmaamaya xaaladda ba'an oo ay ku nooshahay.

## Haadaan Qarkeed

**(Bani'aadamku maanta wuxuu ka lushaa haadaan qarkeed, sababtuna ma aha cabsida laga qabo inuu dabar go'o, cabsidaas waa calaamadaha cudurka ee ma aha cudurkii)[2].**

[1] Wuxuu cutubkan sharxayaa cutubkii koowaad ee Macaalimka oo ah "Hordhaca Tusmooyinka Dhabbaha"

[2] Farta buurbuuran (Bold) ee qoraalka ku dhex jirta waxay muujinaysaa ereyadii Sayidka ee kitaabkiisa "Tusmooyinka Dhabbaha)

Waxaa hubaal ah in aan u baahan nahay in aan dhuganno haadaantaas, waayo inta aan fahamno khatarteeda bay ku xiran tahay in tusmooyin badan oo nolosha ka mid ah ay noo xaddidmaan.

1. Jacayl aan u qabno in laga badbaado haadaantaas

2. Xilka naga saaran in dadka laga samata-bixiyo haadaantaas.

3. Dhibka badan ee lagala kulmayo marka aan isku dayno in dadka laga saaro haadaantaas fog, una soo saarno bannaanka.

Waxaa hubaal ah in arrinkaas uu aad u weyn yahay oo aysan ku filneyn oraahyo iyo wacdi, balse wuxuu u baahan yahay in si qoto dheer loo fahmo haadaantaas, noocyadeeda, heerarkeeda iyo saameynta ay ku leedahay nolosha aadanaha, taas oo aan annagu ka nahay qayb, kuna dhex nool nahay gunta jaahilyadda. Waxaan marnaba laga maarmeyn in si buuxda loo dhuuxo khatartaas iyo sidii looga bixi lahaa haadaantaas.

## Kaalinta badbaadineed ee Rususha

Qofkii daraaseeya taariikhda aadanaha waxaa u muuqanaya in marka ay ummadi ka fogaato Allaah, jaahiliyaddana ay dhex dabaalato; waxaa Allaah u soo diri jiray rasuul gacanta qabta oo hanuuniya, una caddeeya xaqa, kaalmeeyana ciddii badbaado rabta, kuna ooga xujada qofkii diida.

Rusushu waxay markasta imaan jireen xilli ay qoomamkoodu saarnaayeen haadaanta qarkeeda, waxay u sheegi jireen xaqa, waxayna u tilmaami jireen dhabbaha badbaadada, ka hor inta aysan haadaanta ku dhicin.

Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee) wuxuu yiri:

(...َإِنّ اللّهَ نَظَرَ إِلَىَ أَهْلِ الأَرْضِ فَمَقَتَهُمْ، عَرَبَهُمْ وَعَجَمَهُمْ، إلاّ بَقَايَا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ...)[3]

(.. Allaah wuxuu dhugtay dadka dhulka jooga, wuuna u carooday carabtooda iyo cajamtooda, in yar oo ahlu kitaabka ka mid ah mooyee).

Rasuulka inta aan la soosaarin ka hor baa Allaah dhugtay dadka dhulka ku nool oo dhan waxaana ku dhacay caradii Allaah, waayo waxay ka baxeen diintii Allaah, dhulkana wey fasahaadiyeen, waxayna sheegteen rabbinimo, waxayna dadka ka hor istaageen hanuunka Allaah, sidaa awgeed baa Allaah ugu carooday, in yar oo ahlu kitaabka ka mid ah mooyee.

Xilliga ay dadku wanaagga ka beyraan oo ay baadida dhex-jeexaan waa waqtiga Allaah rususha soo diro. Nabi Nuux (Calayhi Salaam) wuxuu yimid markii bani'aadamku muddo dheer ku jiray harka iyo dugsigahanuunka iyo xaqa, kaddibna ay ka beyreen.

Dhibkii ay la kulmeen Nabi Nuux iyo mu'miniintii la socotay bay ducaadda maantana la kulmayaan, kaas oo ah muran, madax-adeyg, gaalnimo-jaceyl, jees jees, baadil ku faanid, ilaahyo been abuur ah, iyo xujo -mucjiso- iyo cadaab dalab.

Muuqaalladaas oo idil waa kuwo soo noqnoqda mar kasta oo rasuul la soo diro, lana rabo in xaqa la caddeeyo, lana badabaadiyo aadanaha maadaama ay haadaan ku dhici rabaan.

[3] Waxaa wariyay Imaam Muslim

Waxaa iska cad in rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee) uu yimid xilli bani'aadamku ay xumaan oo idil ku dhexjireen, ayna qarka haadaanta ka lusheen, ha ahaadaan kuwii asnaamta caabudayey ama ahlu kitaabkaba, dhammaantood waxay ka fogaadeen diinta Allaah, xataa saxaabigii Salmaan Alfaarisi wuxuu ka sheekeeyay in ninkii ugu dambeeyey ee akhyaartii Ahlukitaabka uu la kulmay uu ku yiri:"Wallaahi ma ogi qof kale oo haysta diintan", wuxuuna u tilmaamay sidii uu u beegsan lahaa magaalada Madiina, oo ah meesha uu ka heli karo nabigii ugu dambeeyey.[4]

Ma mooddaa in xilligaas ay dunida oo idil ka gureen ilihii hanuunka, mugdina uu daboolay, waxa kaliya oo la sugaa ay tahay soo bixitaanka nabiga iyo iftiin cusub oo ku baaha dunida?

## Jaahilyadda casrigan

Haddaad dhugato maanta jaahiliyadda cusub iyo nolosha bulshada ma jirto maalin ay uga dhawdahay carada Allaah, balse waxay istaahishaa caro weyn; waayo waxaa gacanteeda ku jira wax walba oo ay ku badbaadi lahayd, Allaahna ugu noqon lahayd. Allaah wuxuu u taagay manaarad joogto ah, cid walba oo hanuun doon ah ay beegsato. Ummadihii hore ma haysan manaaradahaas, iyo wax ay ku hanuunaan, kutubtuna waaba la beddelay, culumadoodiina waxay la yimaadeen diin cusub, ha ahaadaan Yuhuud ama Nasaaro ama kuwa sanam caabudka ah.

Maanta bani'aadamku wuxuu haystaa kitaab uu Allaah xafiday:

﴿ إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا الذِّكْرَ وَإِنَّا لَهُ لَحَافِظُونَ ﴾ [الحجر: ٦]

"Annaga ayaa soo dajinnay Qur'aanka annaga ayaana xafidayna". (Al-Xijri: 6).

Wuxuu kaloo haystaa aadanuhu taariikh ifaysa oo ka warrameysa asxaabtii ku noolaatay diintan oo ku dabaqday noloshooda, ugana baxday gudcurkii ay ku jirtay ilaa ay gaartay fiinta sare ee iftiinka. Waxaad arkeysaa carabtii jahliga eemadax adeygga badnaa oo muddo gaaban isugu beddelay macallimiinta adduunka. Waxaad kaloo arkeysaa carabtii taagta darneyd in ay ku jabiyeen labadii boqortooyo ee dunida ugu itaalka weynaa muddo aan ka badneyn rubuc qarni, kuna dhawaaday in ay kala wareegaan dhulkoodii oo idil.

Kasokow ciriiiriga uu ku jiro aadanuhu, waxaa u dheer in quluubtooda ku abuuran tahay aqbalaadda hanuunka. Allaah oo tilmaamaya ciriirigaas wuxuu Qur'aanka ku yiri:

﴿ وَمَنْ أَعْرَضَ عَن ذِكْرِي فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنكًا ... ﴾ [طه: ١٢٤]

"Ruuxii ka jeesta xuskeyga (Qur'aanka) waxaa u sugnaaday nolol ciriiri ah waxaana soo kulminaynaa maalinta qiyaama isaga oo indho la'". (Dahha: 124).

Hubaashii aadanuhu maanta wuxuu ku nool yahay ciriiri ba'an, wuxuuna ku maman yahay baadinnimadiisa, kuna madax adag yahay.

Qoraal[5] mar dhaw soo baxay wuxuu ka hadlay sida loo sameeyo maahsanaanta. Isaga oo tilmaamaya xaaladda dunida ka jirtamaanta wuxuu yiri: dunidu maanta waxay ku nooshahay maahsanaan, mana taqaan dhabbihii ay u mari lahayd raaxada iyo deggenaanta (sacaadada).

[4] Siiratu Ibnu Isxaaq سيرة ابن اسحاق. ج١. ص٨٩

[5] Waa qoraal la qoray waayadii la sharxayay kitaabka, maqaalku afka carabiga wuxuu ku ahaa صناعة الغيبوبة

Qoraagu wuxuu ka hadlay noocyada kala duwan ee maahsanaata iyo dandarrada haysata bani'aadamka, wuxuuna farta ku fiiqay in maahsanaantaasay dadka gaarsiisay in ay ka habaabaan xaqa iyo iftiinka, gudcurna ay jafaan. Jaahilyadduna maanta waxayba u heellan tahay sidii dadka loo baadiyeyn lahaa, loogana fogeyn lahaa xaqa oo ay u noqon lahaayeen gabi ahaanba kuwo maahsan.

Qofkii fiiriya nolosha jaahiliyadda dhabtii wuu la yaabayaa, wuxuuna is weydiinaya ma laga waayey kuwaan qof waxgarad ah? Xataa kuwooda caqliga lagu sheego marka ay ka hadlayaan sidii badbaado lagu heli lahaa waxay qaadaan dhabbo ka fog badbaadada; waayo ayaga laftooda ayaa ka fog xaqa, waxayna rabaan in aysan waxba ka beddelin nolosha ay hadda ku nool yihiin. Way og yihiin waddada xaqa ah ee lagu badbaadayo, laakiin ma rabaan oo culays bey u arkaan. Bal fiiri, xataa kuwooda caqliga lagu sheego ma rabaan in ay xaqa baaraan, diyaarna uma aha in ay qaataan.

Bani'aadamku waxay ka lushaan haadaan qarkeed, Qur'aankuna wuu kala hadlay arrintaas mu'miniintii hore:

﴿ وَاعْتَصِمُواْ بِحَبْلِ اللّهِ جَمِيعًا وَلاَ تَفَرَّقُواْ وَاذْكُرُواْ نِعْمَةَ اللّهِ عَلَيْكُمْ إِذْ كُنتُمْ أَعْدَاء فَأَلَّفَ بَيْنَ قُلُوبِكُمْ فَأَصْبَحْتُم بِنِعْمَتِهِ إِخْوَانًا وَكُنتُمْ عَلَىَ شَفَا حُفْرَةٍ مِّنَ النَّارِ فَأَنقَذَكُم مِّنْهَا كَذَلِكَ يُبَيِّنُ اللّهُ لَكُمْ آيَاتِهِ لَعَلَّكُمْ تَهْتَدُون ﴾ [آل عمران ١٠٣]

"Qabsada xarigga Allaah idilkiin, hana kala tagina, xusana nimacda Allaah ee korkiinna ah, markaad col ahaydeen oo uu isku dumay quluubtiinna oo aad noqoteen walaalo nimcadiisa darteed, waxaadna ahaydeen kuwa bohol (god) naar ah qarkeed saaran wuuna idin ka koriyey naartaas, sidaas buuna Allaah idiinku caddeynayaa aayadkiisa si aad u hanuuntaan"
(Aala-Cimraan: 103).

Wuxuu kaloo Allaah yiri:

﴿ أَفَمَنْ أَسَّسَ بُنْيَانَهُ عَلَى تَقْوَى مِنَ اللّهِ وَرِضْوَانٍ خَيْرٌ أَم مَّنْ أَسَّسَ بُنْيَانَهُ عَلَىَ شَفَا جُرُفٍ هَارٍ فَانْهَارَ بِهِ فِي نَارِ جَهَنَّمَ وَاللّهُ لاَ يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ﴾ [التوبة: ١٠٩]

"Ma ruux ku aasaasay dhismihiisa Allaah ka baqid iyo raalli ahaanshihiisa baa roon mise mid ku aasaasay dhismihiisa bohol dumaysa qarkeed kulana dhacaysa naarta jahannamo, Allaah ma hanuuniyo qoomka daalimiinta ah". (Al-Tawba: 109).

Mar kasta oo aadanuhu ka leexdo diinta Allaah ku soo dajiyey anbiyadiisa, waxay ka shalwadaan haadaan qarkeed. Waxaan aad ugu baahan nahay in aan fahamno haadantaas iyo khatarteeda.

Sidoo kale Qur'aanku wuu tilmaamay haadaantaas wuxuuna yiri:

﴿ .. وَمَن يُشْرِكْ بِاللَّهِ فَكَأَنَّمَا خَرَّ مِنَ السَّمَاء فَتَخْطَفُهُ الطَّيْرُ أَوْ تَهْوِي بِهِ الرِّيحُ فِي مَكَانٍ سَحِيقٍ ﴾ [الحج: ٣١]

"…Ruuxii Allaah u shariik yeela wuxuu la mid yahay qof ka soo dhacay samada oo ay kala dafayaan shimbiruhu ama ay dabeyshu ku tuurayso meel fog". (Al-Xaj: 31).

Wuxuu salka ugu dhacayaa haadaantii; waayo Allaah ayuu u shariik yeelay wuxuuna ku adkeystay dayacaas. Rusushuna waxay u yimaadeen in guntiga ay ka qabtaan dadka kana celiyaan naarta iyo haadaanta. Kaddib qofkii doona ha rumeeyo, qofkii rabana ha gaaloobo.

Marka aan la hadleynno bani'aadamka waxaan ku hadleynaa hadal uu ka muuqdo kalsooni, yaqiin, deeqtoonaan iyo sarreyn iimaan. Taas si loo gaaro waxay nooga baahan tahay in xaqiiqadaas aan si buuxdo uga dheregsan nahay annagoo yaqiinsan, dareemeyna cisi, adkeysi iyo faraxsanaan, si aan xaqiiqdaan ula hor istaagno dadka oo dhan ayadoo wax cabsi ah ama labalabeyn ah aysan nagu jirin, oo aan og nahay in ay jaahilyaddu hal meel nooga soo jeesan doonto dabac la'aan.

Waxaan ku aragnaa joornaallada ka faallooda xarakaadka Islaamiga ah in ay ku duraan "isla-qummanaan", waayo waxay qabaan labo mid uun: sax ama khalad, islaamnimo ama gaalnimo, xaq ama baadil, umana oggola in ay siiyaan jaahiliyadda fursad ay marmarsiyo ama cudurdaar ku soo gudbiso. Taas waxay na tuseysaa qabka ku jira jaahiliyadda, oo waxayba dhibsanayaan in muslimiintu u arkaan in ay khaldan yihiin.

Waxay dalbanayaan in lala doodo, lana aqbalo ra'yiga qofka kale. Waxay kaloo isu muujinayaan in ay guul ku taagan yihiin xilli ay jabeen, waxayna dareensan yihiin in aysan wax qiima ah ku lahayn muslimiinta agtooda, kuwaas oo aan marna u oggoleyn inay siiyaan fursad ay ku doodaan ama ku cudurdaartaan. Waa in aan sidaas u fahamnaa marka ay ka sheegayaan warbaahinta in islaamiyiintu aysan waxba ka aqoon islaamka, ciddii aanayaga ahayna gaaleysiinayaan. Arrinta gubaysana waa taas. Allaah baaba ku sheegay gaalada in ay gaalo yihiin:

﴿ قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ ﴾ [الْكَافِرُونَ: ١]

"waxaad ku dhahdaa, gaalooy" (Al-Kaafirun: 1)

Jaahiliyaddu waxay saaran tahay haadaan qarkeed sida Sayid Qudub horey u soo sheegay, mana aha dabar go'a ku socda darteed, waana arrin dabiici ah oo ka dhalata falalka jaahilyadda, caasinnimada iyo ka weecashada dariiqa Allaah. Waxaan la hureyn in ilbaxnimo kasta ay dumeyso sida ay doonto ha u sarreysee marba haddii ay bilaabaan dadkeedu dhulka in ay fasahaadiyaan. Xadaarad kasta oo maaddi ah waxay itaal ku yeelataa in dadkeedu iskaashadaan, gutaan waajibaadkooda, ilaaliyaan ballamadooda, si hufanna u gutaan hawlahooda. Akhlaaqdaas wanaagsani waxaan looga maarmin jiritaanka xadaaradda (ilbaxnimada). Balse marka dadku ku mammanaadaan shahawaadkooda, oo ay ku fogaadaan faajafaajoodka, qabka iyo islaweynida, waxaa ku bilaabmaya xadaaraddaas kala furfurasho iyo liicid… Waayo shaqo wanaajin maayaan, ballanna dhawri maayaan, waxay bilaabayaan in ay is dulmiyaan, xadaaraddina halkaas ayey ku dhammaatay.

Baaba'u waa mid aan la hureyn in uu ku dhaco bani'aadamka; waayo waxay ka fogaadeen Allaah. Sidaa awgeed ayuu Ustaad Sayid Qudub u yiri tani ma aha cudur ee waa calaamadaha cudurka. Waa sida geerida oo kale oo maaha cudur balse waa calaamad muujinaysa in ay xubnaha jirka ay gabeen shaqadoodii. Bani'aadamkuwaa bukaa meelna uma fiyooba waana middaas tan keentay in uu baaba'ayo.

## Ahmiyadda Qiyamka

In bani'aadamku ka arradan yahay qiyamka ayaa ah cudurka. Sayid Qudub wuxuu isticmaalay ereyga (Qiyam) si uu ugu muujiyo wax kasta oo ku weyn nolosha aadanaha, ha ahaato caqiidada, akhlaaqda, dhaqanka iyo horumarka, ama qiyamka nolosha oo dhan. Bani'aadamkuna wuxuu wax ku yahay qiyamkaas, la'aantiisna aadanahu waxba ma aha.

Waxaan arkeynaa in taariikhdu ay bilaabatay markii uu bani'aadamku dareemay qiyamka, waa markii Nabi Aadam lagu afuufay ruuxdii oo ay dhoobadii noqotay insaan. Ka hor intaa aan ruuxda lagu afuufin wuxuu ahaa dhoobo meel iska taal, mana aysan garaneynmalaa'iktu waxa uu yahay makhluuqaas. Markii ruuxdii lagu afuufay waxay arkeen wax ka duwan oo aan la mid ahayn makhluuqaadka kale, waxaana lafaray malaa'ikta in ay u sujuudaan.

Allaah wuxuu Qur'aanka yiri:

﴿ فَإِذَا سَوَّيْتُهُ وَنَفَخْتُ فِيهِ مِن رُّوحِي فَقَعُواْ لَهُ سَاجِدِينَ ﴾ [الحجر: ٢٩]

"Markii aan dhammeystiro kuna afuufo ruuxda u sujuuda" (Al-Xijr: 29)

Ruuxdii siisay qiimahaha bani'aadamkii dhoobada ahaa, haddii ruuxdaas meel sare gaarto oo ay hoggaamiso wuxuu noqonayaa bani'aadam sax ah, balse haddii dhoobadu hoggaamiso oo la dayaco ruuxda wuxuu ka hoos maraayaa heerka xayawaanka iyo manoolaha بَلْ هُمْ أَضَلُّ (Wayba ka sii lunsan yihiin).

Qur'aanku marka uu ka hadlayo muuqaalka dadka fogaaday, ee dayacay amaanadii loo dhiibay iyo xaqii lagu sharfay, waxaa lagu tilmaamay dameer kutubbo xambaarsan oo aan warba ka hayn qiimaha waxa uu sido. Allaah wuxuu yiri:

﴿ مَثَلُ الَّذِينَ حُمِّلُوا التَّوْرَاةَ ثُمَّ لَمْ يَحْمِلُوهَا كَمَثَلِ الْحِمَارِ يَحْمِلُ أَسْفَارًا ﴾ [الجمعة: ٥]

"misaalka Kuwii la faray in ay kitaabka Tawraad qaadaan (ilaaliyaan kuna camal falaan), haddana aan xambaarin (aan ku camalfalin), waa dameer kutubbo xambaarsan oo kale" (Al-Jumca: 5).

Dameerku ma garanayo, mana oga qiimaaha kutubta uu xambaarsan yahay, loogamana fadhiyo in uu wax ka kororsado. Bani'aadamka xaqa garanaya oo aan ku dhaqmeyn wuxuu ka liitaa dameerka; illeen dameerku waa gartiis, laakiin bal ka warran dameer suurad bani'aadam leh, caqli uuku fakari karana leh? wuxuu ka liidanayaa xayawaanka.

Waxaa hubaal ah qof uu Allaah siiyey aayaadkiisa oo ka siibta kana doortay hawadiisa, in uu haystay fursad weyn, aqoon iyo karti uu sare ugu kaco, haseyeeshee wuxuu isku dhajiyey dhulka, hawadiisa ayuu raacay, wuxuuna noqday ey oo kale.

Allaah wuxuu yiri:

﴿ وَاتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ الَّذِي آتَيْنَاهُ آيَاتِنَا فَانسَلَخَ مِنْهَا فَأَتْبَعَهُ الشَّيْطَانُ فَكَانَ مِنَ الْغَاوِينَ ۞ وَلَوْ شِئْنَا لَرَفَعْنَاهُ بِهَا وَلَكِنَّهُ أَخْلَدَ إِلَى الْأَرْضِ وَاتَّبَعَ هَوَاهُ فَمَثَلُهُ كَمَثَلِ الْكَلْبِ إِنْ تَحْمِلْ عَلَيْهِ يَلْهَثْ أَوْ تَتْرُكْهُ يَلْهَثْ ﴾ [الأعراف: ١٧٥-١٧٦]

"ku akhri dushooda kii warkiisaaan siinnayaayadaheenna kase siibtay, shaydaanna uu raacay, kana mid noqday kuwa baadiyoobay. Haddaan doonoo waa koryeeli lahayn, haseyeeshee wuxuu isdhigay dhulka (adduunyo jacayl) wuxuuna raacay hawadiisa, wuxuuna la mid yahay sidii ey oo kale, haddaad erisohiraan hiraya, haddaad deysana hiraan hiraya" (Al-Acraaf: 175-176).

Allaah wuxuu kuwaas ku sheegay in aysan caqliba lahayn, waxna aysan maqleyn, kana liitaan xoolaha:

﴿ أَمْ تَحْسَبُ أَنَّ أَكْثَرَهُمْ يَسْمَعُونَ أَوْ يَعْقِلُونَ إِنْ هُمْ إِلاَّ كَالأَنْعَامِ بَلْ هُمْ أَضَلُّ سَبِيلاً ﴾ [الفرقان: ٤٤]

"Mise waxaad u maleyneysaa in badankood wax maqlaan ama wax gartaan, waa uun xoolo oo kale, iyagaaba ka sii dhunsan" (Al-furqaan: 44).

Wuxuu kale oo Allaah yiri:

﴿ إِنَّ شَرَّ الدَّوَابَّ عِندَ اللّهِ الصُّمُّ الْبُكْمُ الَّذِينَ لاَ يَعْقِلُونَ ۞ وَلَوْ عَلِمَ اللّهُ فِيهِمْ خَيْرًا لَّأسْمَعَهُمْ وَلَوْ أَسْمَعَهُمْ لَتَوَلَّواْ وَّهُم مُّعْرِضُونَ ﴾ [الأنفال: ٢٢-٢٣]

Wax tukuba (dhul socde) waxaa ugu shar badan Allaah agtiisa ma maqle (xaqa), ma hadle aan waxba garaneyn. Haddii uu Allaah ku og yahay kheyr waa maqashiin lahaa, hadduu maqashiiyana wey jeesan lahayeen iyaga oo is dadbaya) (Al-Anfaal: 22-23).

Waxaa kale oo Allaah yiri:

﴿ إِنَّ شَرَّ الدَّوَابِّ عِندَ اللّهِ الَّذِينَ كَفَرُواْ فَهُمْ لاَ يُؤْمِنُونَ ﴾ [الأنفال: ٥٥]

"Wax tukuba (dhul socde) waxaa ugu sharbadan Allaah agtiisa kuwa gaaloobay oon aan rumeyneyn" (Al-anfaal: 55).

Waxaa la hubaa in marka aadanuhu dhexgalo adduunkiisa, marka uu ka indha beelo iftiinka xaqa, in uu noqonayomid ka liita xayawaanka. Qur'aanku marka uu nala hadlaayo aad buu noo dhiirri galinayaa, wuxuuna nagu tirtirsiinayaa in aannan hoos ugu degin heerka xayawaanka. Haddii bani'aadamka qaarkood ay lahaan lahaayeen caqli, way diidi lahaayeen in ay dhammaad xun ku dambeeyaan, naarna ay ku waaraan.

﴿ وَقَالُوا لَوْ كُنَّا نَسْمَعُ أَوْ نَعْقِلُ مَا كُنَّا فِي أَصْحَابِ السَّعِيرِ ﴾ [الملك: ١٠]

"Waxay yiraahdeen haddaan wax maqli lahayn, ama garasho lahaan lahayn, kama mid noqonneen naarta saciira ehelkeeda" (Al-Mulk: 10).

## Qaab-fekerka reer Yurub iyo kaalinta Yuhuudda

Balse jaahilyaddu marar badan waxayba ku faantaa xayawaannimada oo wey ku raaxeysataa, waxayna ka qoomameyneysaa in ay bani'aadam ahaato. Hinqashadii(baraaruggii) Yurub dhammaanteed waxaa sal-dhig u ahaa xayawaannimada bani'aadamka, waana sida ay rabeen mufakiriintooda iyo shacabkooduba.

Allaah SWT wuxuu yiri:

﴿ وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ وَحَمَلْنَاهُمْ فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ وَرَزَقْنَاهُم مِّنَ الطَّيِّبَاتِ وَفَضَّلْنَاهُمْ عَلَى كَثِيرٍ مِّمَّنْ خَلَقْنَا تَفْضِيلاً ﴾ [الإسراء: ٧٠]

"Dhabtii waan sharafnay bani'aadamka, waxaanna ku xambaarnay barriga iyo baddaba, waxaanna ku arsuqnay wanaag, waxaan ka sare marinnay in badan oo aan abuurnay sara marin". (Al-Israa: 70).

Allaah wuxuu kaloo yiri:

﴿ وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلاَئِكَةِ إِنِّي جَاعِلٌ فِي الأَرْضِ خَلِيفَةً ﴾ [البقرة: ٣٠]

"Waxaad xustaa waqti uu Allaah ku yiri malaa'ikta, dhulka waxaan u sameynayaa khalif"
(Al-Baqara: 30)

Laakiin dadku marabaan in ay ahaadaan wakiillo (khaliif), mana rabaan in ay ahaadaan bani'aadam, waxay doonayaan in ay noqdaan xayawaanno.

Hinqashadii reer galbeedka waxay ku dhisantay fikradda xayawaannimada bani'aadamka. Aragtida Daarwin[6] waxay noqotay aragtida saldhigga u ah aragtiyooyinka reer Yurub, waxayna u arkeen in ay ahayd aragtidii ka badbaadisay talomaroorsigii kaniisadda; xadgugubkii diinta iyo caburintii ruhbaaniyada. Daarwiin wuxuu sharxay jarnjarada muuqaallada noocyada noolaha. Daarwin kama hadlin aragti cilmiyeed aan ahayn bayolojiga ku saabsan tadawur noolayaasha, kamana hadal taariikhda fekerka, dhaqan iyo diineed ee aadanaha.

Laakiin Yuhuuddu aragtida Daarwiin way ka faa'iideysteen si ay uga dhaliyaan arrimo baabi'iya nolosha bani'aadamka, marmarsiiyana u noqda in laga fallaagoobo kaniiisadda, meeshana laga saaro diinta, waayo Yuhuuddu waxay rabeen in masiixiyiinta ay ka saaraan diintooda, oo ay diin fiican iyo nolol saxanba ay gafaan. Taas faa'iido ayey u ahayd Yuhuudda, waayo waxaa meesha ka baxaya caqabado diimeed oo cadaadis ku hayey.

Qofka u dhashay Yurub wuxuu ula dhaqmi jiray Yuhuudiga sida eyga oo kale, haddii uu deyn ka qaadanayo wuxuu oranjiray: "miiskaas saar lacagta, hana igu taaban gacantaada". Yuhuudigu wuxuu dareemi jiray in cadaadis adag uu saaran yahay.

Markuu bilowday kacdoonkii looga soo horjeestay kaniisadda, waxay soo jeediyeen in lagu daldalo dhulgoosadaha ugu dambeeya mindhicirka badariga ugu dambeeya. Waxay Yuhuuddu ku dadaaleen in ay ka fogeeyaan diintooda, una baddalaan kacdoonkaas mid ka dhan ah diin oo dhan, kacdoon ka dhan ah Allaah iyo qiyamka oo idil, iyaga oo adeegsanaya aragtida Daarwiin, waxayna saldhig uga dhigeen isbedelkaas ka dhacay Yurub.

Daarwin ma ahayn kii ugu horreeyay aragtidatadawurka (horumarka iyo kobcidda abuurka). Waxaa uga horreeyay oo soo hindisay nin Faransiis ahaa oo la oran jiraya Lamark. Haseyeeshee Yuhuuddu way ka faa'iidaysan weyday markaas, maxaayeelay kaniisadda ayaa xoog lahayd. Markii ay daciiftay, dadkuna bilaabeen inay ka gilgishaan oo uu bilowday kacdoonkii kaniisadda lagaga soo horjeeday, waxay fursad u heleen inay ka faa'iidaystaan aragtidii Darwin si ay reer Yurub u baadiyeeyaan ugana xarrimaan rajo kasta oo keeni lahayd inay Allaah usoo laabtaan.

Waxa ugu horreeya ee laga dheehan karo aragtida Darwin waxa weeye <u>in la inkiro jiritaanka Allaaha abuuray kownka</u>. Darwin wuxuu yiri: "in la maleeyo inay jirto awood caqli iyo ujeeddo leh oo ka dambaysa abuuridda nolosha waa ayada oo la soo dhex geliyo howl makaanik ahaan u socota waxaan ka mid ahayn!". Markaas ayay qaateen erayadii Darwin si ay u sugaan in cilmi ahaan uusan jirin khaaliq (mid wax abuura), markay sugayaan inkiraadda jiritaanka Allaah waxay u jeedaan inay dibir la helaan kaniisadda ama ay legdaan, waayo waxay kaniisaddu isku qaadqaadaysay waa magaca Rabbi, marka fekerku waxa weeye ha dhaco Rabbigaas, kaniisadduna ha la dhacdo. Waxyaabaha kaniisaddu oran jirtay waxaa ka mid ahaa: "Yasuuc Rabbigeen wuxuu yiri awooddayda waxaan siiyay kaniisaddayda, waxa ay

[6] Charles Daarwin (1809-1882) waa saynisyahan reer galbeed ah oo billaabay fikirka (Darwinism) ee ku dhisan in bani'aadanku ka yimaadeen xayawaanka oo ay marba heer soo mareen, laga soo billaabo hal-unugley ilaa bani'aadam laga soo gaaro

kaniisaddu dhulka ka gunuddo ayaa samadana ka guntan, waxay furto ayaa furan". Marka kaniisaddu iyadaaba ilaah ah. Haddaba si ay xujada kaniisadda u jebiyaan ayey uga faa'iidaysteen una buunbuuniyeen fikradda Allaah inkiridda ah. Laga bilaabo markaas in la inkiro khaaliqu waxay noqotay cilmi sax ah, qofkii diidana waxaa lagu xukumayay inuu haraadi yahay madaama aragtida cusub qabto in Allaah la inkiro.

Arrinta labaad oo ay argtida Daarwin laga dheehan karo waa xayawaannimada aadanaha. Diimuhu bani'aadamka aad bay u sharfeen, waxayna ku tilmaameen in uu yahay wakiilka Allaah ee dhulka, Allaahna uu gacanatiisa ku abuuray, kana sare mariyey dhammaan khalqiga kale, uuna si gaar ah ugu soocay caqliga. Sidaa darteed, bani'aadamku wuxuu huwanaa sharaftaas oo u diidaysa in uu hoos ugu dago xayawaannimo. Daarwin iyo kooxdiisu aad bay u dhibaysay kaniisadda talooyinkeeda, suufinnimadeeda iyo arrimaha badan oo ay xaaraanta ka dhigtay. Waxay doonayeen in ay u noqdaan dugaagnimadii ay ku noolaayeen xilliyadii Giriigga iyo Roomaanka. Waxay keeneen fikradda xayawaanimada bani'adamka, oo ah inuu asalkiisu ahaa daanyeerada waaweyn oo ka soo tafiirmay daanyeero hore, kuwaasnaayiyagana ka soo farcameen naasley hore. Sidaas darteed, bani'aadamku waa giraan ka mid ah silsiladda dheer ee noolaha, mana jiraan wax uu gaar la yahay, illeen waa xayawaan, mar dhawna wuxuubaahaa daanyeer.

Marba haddii uu bani'aadamka yahay xayawaan, looma baahna in uu lahaado akhlaaq, diin iyo qiyam toona. Waa in loo daayaa xayawaannimadiisa. Dadaal kasta oo loo galo si looga saaro xayawaannimadaas waa aqoondarro, waana gardarro lagu hayo xaqiiqda jirta (xayawaanimada), iyo ciqaab la saarayo baniaadamka. Waxaa lama huraan ah in bani'aadamka laga xoreeyo insaannimadiisa, oo uu ahaado xayawaan. Daarwiin kaddib fikradda sheegeysa xayawaannimada bani'aadmka waxay noqotay saldhigga dhammaanaqoonyahannada reer Yurub. Idilkood waxay ka ambaqaadayaan in uu yahay insaanku xayawaan haba ku kala duwanaadaan qaabka xayawaanimada.

Freud[7] wuxuu qabaa in insaanku yahay xayawaan u nool is-orgeyn. Bahda suluukiyiinta[8] waxay leeyihiin insaanku waa xayawaan aan feker, doorasho iyo damac toona lahayn, waxaana wada fal-naqsi, ee asago masuul kama aha waxa uu sameynayo, kamana noqon karo.

Kuwa qaba fekerka Wujuuddiyada[9] waxay aaminsan yihiin in bani'aadamku yahay xor, sida uu doonana uu u dhaqmi karo, dhibkuna wuxuu ka jiraa wixii aan asaga ahayn, waana sida uu yiri Jean Paul Sartre.

Xayawaan ka yeellidda bani'aadamka waa fikrad khatar ah. Marba hadduu yahay xayawaan, ka xishoon maayo inuu dheddiga ugu tago waddooyinka, sida xaywaanku dheddigiisa dariiqa dhexdiisaugu galmoodo, muxuu bani'aadamka arrintaa uga xishoonayaa inuu sameeyo? Dhabtii way ku guulaysteen in qofka Yurub ama Ameerika jooga uusan ka xishoon in jidka dhexdiisa uu ugu galmoodo dheddiga. In la mucaarado arrintaas waxayba noqotay arrin dib u dhac ah oo fool xun, ahna in la faragashaday arrimo shakhsi ee uu qofku leeyahay.

---

7 Sigmund Freud (1856-1939) waa saynisyahan yahuudi ah oo cilmu nafsiga ku takhasusay, ahaana qofkii keenay fikradda oranaysa wax walba bani'aadanka waxaa ku bixiya jinsi ama (sex drive)

8 Suluukiyiinta waa dhaqdhaqaaq qarnigii 20aad billowday, kaasoo cilmu nafsiga u adeegsanaya inuu wax walba u tiiriyo dhaqanka, dhaqanka qofkana in si cilmiyaysan loo baari karo iyo inuusan ku xirnayn qofka gudihiisa waxa ku jira iyo dareenkiisa midna

9 Wujuudiya waa fikrad qarnigii 20aad billowgiisii soo shaacbaxday, kuna dhisan mabda'a ah in qofku yahay xor, wax reebayana aysan jirin, raggii ugu caansanaa ee fikirkaas waxaa ka mid ah Jean Paul Sartre

Haddii aad aragto falkaas, ilbaxnimadu waxay tahay in aad u aragto arrin aan ku khuseyn oo aan wax dhib ah kugu heyn, oo la mid ah adiga oo arkey qof wax cabbaya ama cunaya. Sidoo kale kama duwana haddii arrimo jinsi ah uu ku sameeyo dariiqa, baska, jardiinada (beerta nasashada) ama meel kasta. Si xun in aad u dhugato waxay muujinaysaa inaad tahay dib-usocod, qofkaasna wuxuu xaq u leeyahay in uu kugu soo oogo dacwo.

Haddaba waxay ku guuleysteen in ay bani'aadamkii ka dhigaan xayawaan shahwo kaliya ay waddo sida Freud qabo. Freud wuxuu aaminasanaa in xayiraad kasta oo laga saaro bani'aadamka xagga jinsiga ay ka soo horjeeddo raaxadiisa (sacaadadiisa). Wuxuuna u arkaayey in akhlaaqdu iyo dhawrsanaantu tahay qallooc. Wuxuuba u haystay in xadaaradda ay aadanaha dulmisay, ayna ka qaadatay qayb ka mid ah tamartiisa una isticmaashay aqoonta, hal-abuurka, dhismaha iyo horumarka. Xadaarad bay u sameysay balse way dulleysatay waayo uma aysan oggolaan in uu unoolaado sida xayawaanka ku jira keynta(jiqda) oo aan ka fekereyn in uu sameysto ilbaxnimo. Su'aashu waxay tahay muxuu isugu xirayaa ilbaxnimada maadaama ay wax badan u diidayso oo ay xayirayso?

Dulmarkaas waxaan uga golleenahay in aan si qoto dheer u aragno qaabka qalliban oo ay reer galbeedku u fekerayaan. Waxaa muuqata in arrinku uusan ku ekeyn ku kufrinta Allaah, ama in la shaki geliyo jiritaankiisa, balse arrintu waa in laga xarga goosto fidrada, lagana fogaado wax kasta oo aadanaha sharaf u yeelaya.

Xayawaannimada bani'aadamku waxay noqotay rabitaanka bulshada, qofkii aan rabin in uu hoos ugu noqdo xaywaannimo waxaa loo arkaa qof ka haray ilbaxnimada reer Yurub. Sidaa awgeed waxay rabaan inay si xoog ah ugu faafiyaan fekerkaas dhulka oo dhan, ayaga oo adeegsanaya shirarka deegaannada, kuwa haweenka iyo kuwa kalaba. Waxaa kale oo ay adeegsanayaan sawirro iyo joornaallo muujiya fuxshiga, kuwaas oo buuxa meelaha basaska iyo tareennada laga raaco, waxaana ku qoran canaawiinta uu ka heli karo qofka fuxshigaas raba. Lahay iyo Amsterdam waxaaba ku yaalla dariiqyo u gaar ah oo lagu soo bandhigo haween sidii ay hooyadood ku dhashay ah (qaawan), waxaa la soo bandhigaya qiimaha iyo waqtiga. Waxaa kala oo la soo bandhigaa carruur ku jirta quraarad oo loo iibsanaayo sida kabaha ama dharka. Arrinkaas waa arrin jaahiliyadihii hore aysan sameyn jirin, jaahiyadda maanta ay aad ugu dheggen tahay, kuna mamman tahay.

Taasi waxay nagu bixinaysaa in aan ku adkeysanno daahirinta jaahilyaddan oo aan nafta ag dhigno, diidnana wax gorgortan ah in lagala galo arrimahaas, waayo waa arrimo qof nadiif ah uusan aqbali karin iskaba daa qof aaminsan risaaladii nabiyada. Bani'aadamku in uu ka xoroobo qiyamta asalka ah waxay u keentay hoos u dhac iyo dayac ku yimid aadanaha, ha ahaado dhinaca reer galbeedka ama dhinaca reer bariga.

Qofku wuxuu is oran karaa isbahaysigii barigu wuu burburay. Haa, nidaam ahaan wuu dhacay, laakiin fekerkii shuuciyadda wali xididdo adag buu ku leeyahay gaashaanbuurta reer bariga iyo in badan oo Xisbiyada Shuuciga caalamiga ah ka mid ah. Nidaam ahaan wuu dhacay, waayo wixii ay ku burburi lahaayeen bay gudaha ku wateen, mana sii jireen mar hadduu fidarada ka soo horjeedo. Waxaa kaloo riday cabsi uu ka qabo in dadkii uu dulmiyey ay ka dareeraan oo ka raadsadaan waxay kaga badbaadaan dhibkaas, lagamana yaabo inay ka helaan badbaado Islaamka mooyee. Waxaa si gaar ah Jihaadkii Afqanistaan saameyntiisu u gaartay gobolladii asalkoodu islaamka ahaa oo ka tirsanaa midowgii soofiyeetka. Waxaa soo galay rajo ah in haddii ay sameeyaan sida reer Afqaanistaan in ayaguba xoroobi karaan. Arrintaas waxay u arkeen kuwii sharta jaangoyn jiray in ay tahay arrin khatar ah, waxayna durbadiiba si dhakhso ah oo lala yaabay u dedejiyeen riditaankii midowga Sofiyeeti si ay

gacantareer galbeedka u soo galaan una heleen xorriyad iyo nolol raaxo leh oo aysan raadin wax diin ah.

Reer Galbeedku ama reer Barigu labadooduba wey ka fog yihiin Allahii abuuray, ka fog yihiin qiyamka iyo asaaska tiirka bulshada ee ah qoyska. Fekerka reer galbeedka oo idil waxay burburiyeen qoyska waayo waa isha wanaagga iyo qiyamka dadku ka qaataan, sidaa darteed ayey u burburiyeen midnimada asaasiga ah ee aadanaha.

## Arradnaanta ilbaxnimada reer Galbeedka

Maadaama reer galbeedku ka arradan yihiin qiyamka, kuma habboona in ay wax hoggaamiyaan. Sidaaawgeed waa in la helaa hoggaamin cusub**. (Hoggaamintii reer galbeedka waxay ku dhawdahay in ay meesha ka baxdo, sababtu ma aha in ay faqrisay ama uu ku yimid itaal-darro xagga milateriga ama dhaqaalaha ah).** Taas waa arrin iska cad oo ma aha in tabardarri dhaqaale iyo mid milateri ay hadda heyso.

Mareykanku wuxuuba isu haystaa in uu yahay hoggaamiyaha dunida, cidduu rabana edbin karo, waxa uu rabana sameyn karo; milateri iyo dhaqaale ahaanba. Heshiiskii GATT[10] iyo dhacdooyinka socda waxay tilmaamayaan in ay sii kordheyso awooddeeda dhaqaale iyo mid ciidanba**. (Laakiin nidaamka reer galbeedku wuu dhammaaday dawrkiisii, mana hanto qiyam uu wax ku hoggaamiyo).** Nidaamkaas halka looga imaanayo oo uu eedaywaa tuuridda qiyamka iyo duminta tiirarka saldhigga asaasiga u ahbani'aadamnimada. Haddii ay dumaan tiirarkaas waxba ma tarayaan dhaqaale horumaray iyo awood ciidan midna.

**(Waxaa lagama maarmaan ah in la helo hoggaamin bani'aadmka u keenta qiyam cusub iyo manhaj nolshooda beddela, asaga oo ilaalinaya horumarka xadaaradda maaddiga ah ee Yurub horseedka ka ahayd).** Marka uu Sayidku ka hadlayo qiyamka cusub kama wado islaamka aragtida ah, arrintu ma joogto aragti iyo marjic loo noqdo ee waa wax qabad dhab ah. Bani'aadamka kuma dhaqmaan qiyamka islaamiga ah, ha ahaado waddamadii islaamka ahaan jiray ama kuwa jaahiliga ahaaba. Haddaba qiyamka islaamku waa kuwa si buuxda u cusub, inkasta oo ay kitaabbada ku qoran yihiin, lagana helaayo taariikhda islaamka, balse nolosha maanta jirta qiyamkani waa mid ku wada cusub.

Waxaan ujeednaa isburintaas xataa inay ka jirtobulshadeenna dhexdeeda. Waxaad arkeysaa gabar xijaaban oo haddana ismarinaysa rinjiyo kala geddisan, qaadaneysana dhar aad u dhaldhlaalaya. Arrintaasu waxay caddeyneysaa hal shay oo ah in islaamku iyo xijaabkuba uusan ahayn faham kaliya. Xaramka waxaa ku arkeysaa haween cimreysanaya oo dawaafaya misana labbisan dhar leh midabbo ku soo jiidanayo taas oo caddeyneysa in aan la fahmin macnaha fitnada, asturka iyo dhawrsanaanta. Waxaa kaloo la fahmin in ragga ay saameyneyso fitnada haweenka. Sidaaba haddey tahay xijaabku wax qiimo ah kumalaha agtooda. Ujeeddadu ma aha asturaadda jirka oo kaliya, ee waa in ay ka muuqataa xishood, dhawrsanaan iyo nadaafad aan ragga damac galineyn.

### Islaamka dhabta ah ayaa mudan hoggaaminta

Haddaba islaamku wuxuu soo gudbinayaa qiyam cusub asaga oo ilaalinaya horumarka ay gaartay hal-abuurnida reer galbeedka dhinaca maaddada. Islaamku ma diidayo maaddada, wanaaggaiyo nadaafadda. Islaamku camiraadda dhulka wuxuu u arkaa qayb ka mid ah

[10] GATT waa general agreement on Tarrifs and Trade, waa heshiis ganacsi oo ay dalal badan galeen 1947dii, maanta waxaa loo yaqaannaa WTO ama world trade organization

hawshiisa oo leh shuruudo khaas ah. Sidaas hadday tahay cidina cabsi Kama qabto in islaamku hoggaamiyo bani'aadamka, waayo muhimmaddiisa waxaa ka mid ah in uu xafido horumarka xadaaradda marka uu toosiyo kaddib.

**(Islaamka kaliya ayaa hanta qiyamkaas iyo manhajkaas. Hinqashadii cilmigu kaalinteedii way gudatay laga bilaabo qarnigii lix iyo tobanaad, gaartayna fiidda ugu sarreysa qarniyadii siddeed iyo tobanaad iyo sagaal iyo tobanaad… Kayd dambana uma harin. Sidoo kale waddaniyadda iyo qowmiyadda oo xilligaas soo ifbaxay iyo isbahaysiyada goboleed waxaa iyana ka idlaaday wixii qiimiay lahaayeen. Kaddib way fashilmeen nidaamyadii ku dhisnaa lahaansho gaar ahaaneed iyo lahaansho wadareed. Waxaa la gaaray dowrkii islaamka iyo kii ummadda xilligii loogu baahi badnaa).**

Waxaan lagu muransaneyn in aadanuhu xilligaangaar ahaan dunida muslimka uu ka jiro isdhexyaac farabadan oo wax la mid ahi jirin. Masiixiyiinta, sanam caaabudka iyo shuuciyiintu mid kasta waa og yahay waxa u tiigsanaayo ama rabo. Hantigoosigu waa u daacad ra'samaaliyaddiisa, shuucigu waa lamid, Sanam caabidkuna diintiisa ayuu ku qanacsanyahay.

Laakiin dunida muslimka waxay ka hadlayaan qiyam sare iyo qaddiyado muhiim ah, si bayaan ahna u sharxayaan arrimaha islaamka. Haddii aad dhageysato idaacadaha Qur'aanka ee ka hadla islaamka, akhlaaqda, qoyska, iskaashiga, nadaafadda, isdaahirinta, iwm, waxaa ka heleysa hadal aad u bilicsan iyo qiyam aad u sarreysa. Sidoo kale madaxduba waxay isku dhibaan in ay hadaladaas oo kale ka sheegaan shirarkooda. Balse kama muuqato noloshooda. Ummaddii beri islaam ahaan jirtay sida ay u wareersan tahay cid u wareersan maba arkeysid.

Dawrka islaamku wuxuu yimid xilli ummaddu la liicayso wareer iyo isdhexyaac; waana in la helaa hab loola jaanqaado waxa taagan; sidee islaamka ugu gudbin karnaa iyaga iyo dadka intiisa kale? Waxaa loo baahan yahay hal-abuurnimo ama habka ugu habboon ee hawshaas lagu gaari karo.

**(Waxaa lasoo gaaray kaalintii (dowrkii) islaamka aan diidaneyn hal-abuurka maaddiga ah, waayo wuxuuba u arkaa in ay tahay muhimmadda bani'aadamka loogu dhiibay khilaafada, wuxuuna u arkaa-ayadoo la tixgalinayoshuruudo gaar ah-in ay tahay cibaado iyo in la tiigsado ujeeddada loo abuuray aadanaha).**

## Sidee buu Islaaamku u gudan karaa kaalintiisa?

Laakiin lama hurayo in islaamku uu matalo mujtamac nool si uu uga saaro dadka mugdiga ay ku jiraan una bixiyo iftiinka. Waa lama huraan in ummaddu beddesho nafteeda si uu Allaah u beddelo xaalkeeda, way hoobanaysaaye inay kor u kacdo, way dullaysan tahaye inay cisowdo, way taag daran tahaye inay quwowdo, nasiibdarrada iyo ciriirigana sacaado loogu beddelo, baqdintana amni loogu bedelo.

﴿ إِنَّ اللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّى يُغَيِّرُوا مَا بِأَنْفُسِهِمْ ﴾ [الرعد: ١١]

"Allaah ma beddelo xaaladda qoom ilaa ay ayagu isbeddelaan" (Al-racdi -11).

**(Islaamkuse ma gudan karo waajibaadkiisa in ay mujtamac ama ummad ay matasho mooyee. Bani'aadamku maanta dheg jalaq umasiinayaan caqiido mutuxan oo aan dhaqan lahayn).**

Bani'aadamku waxay u oomman yihiin wax la taaban karo. Wax kasta oo jiritaan muuqda lehna wuu ka saamayn ogyahay aragtiyada qurxoon ee khiyaaliga ah. Waa in uu yeeshaa

mujtamac ku dhaqma mabaadi'da lagu yaqaanno ummad muslim ah xagga nolosha, manhajka, akhlaaqda, anshaxa, iyo xiriirka bulshada.

Waa in dhidibbada loo taagaa bulshadaas waayo dunida islaamka maanta waxay iska sheeganayaan islaam aysan ku dhaqmin. Taasina waa been weyn, waxaana caddeynaya isburinta dhaqankooda iyo waxa ay sheeganayaan. Arrinkaas kuma kala duwana dawladaha islaamka isxijiya, iyo kuwa aadka uga fog. Dhammantood islaam ma dhaqangeliyaan, jaahilyadduna waa og tahay arrinkaas, si kasta oo ay isu qariyaan.

Maxaa suurta gelinaya in ay dadku Islaamka ku qancaan maanta? Waxaa waajib ah in la helo mujtamac ku dhaqma islaamka. Sayidku wuxuu ka yiri arrintaas **(Ummadda muslimiintu ma aha dhul uu mar islaamku ka talin jiray, mana aha dad awoowayaashood xilli ka mida taariikhda ay ku noolaayeen nidaamka islaamka).**

Taasna waa midda maanta jirta. Dunida Islaamka sheegata oo idil waxay ku faaneysaa waayahoodii hore iyo guulihii la gaaray. Waxaase la yaab leh in culumada ama culumo-ku-sheeggu in aysan fahmeynin arrinkaan.

**(waa in dib loo soo celiyaa ummaddaas jiritaankeeda)**

Ummaddaas uu Sayidku tilmaamayo ma aha taariikh ama goob. Ummadda muslimaddu waa koox dadka ka mid ah oo noloshooda, fekerkooda, nidaamkooda, qiyamkooda iyo hal-beeggoodaba laga soo xigtay manhajka islaamiga ah.

Ummadda tilmaamahaas leh waxay meesha ka baxday markii dunida oo idil laga tirtiray shareecada Allaah. Waa hubaal in qeexitaankaas uusan cusbeyn, waana xaq fudud inkastoo ay layaab ku tahay dadka badilka wata.

Sidaa marka uu u qeexo islaamka waxaad arkeysaa culumo ka tirsan Alazhar oo oranaysa:" Xukuumaddeennu Allaah xukunkiisa ma diidana". Inaa lilaah wa inaa ilayhi raajicuun! Ummaaddaas habaca iyo baadinimada ku jirta miyaa la oranayaa xukuumaddooda waa xukuumad muslim ah oo aan diiddanayn xukunkaAllaah?! Taasi waxay tilmaamaysaa xaqiiqada ah in cilmigu uusan ahayn wax maskaxda laga buuxiyo, waxaana marag madoonta ah in culumada aysan ahayn kuwa urursada kutubbada iyo maraajicda, fiqigana ku mashquulsan laakiin xaqiiqada dhabta ee islaamka ah jaahil ka ah. Culumo in ay yihiin kuwaas iska dhaafe, waa khaa'iniin iyo kuwa dadka baadiyeeya. Waxay u haystaan in ay hanuunsan yihiin laakiin ma rabaan in ay xaqa ogaadaan.

Waxaa waajib ah in la soo celiyo ummaddaas si uu islaamka u guto dowrka hoggamineed ee laga sugayey mar kale; waayo islaamku jamaaco la'aan ma istaagi karo. Taas ayaa ka dhigeysa in dib loo helo ummaddii islaamka ahayd mid lagama maarmaan ah.

Waa in dib loo taagaa ummaddaas muuqeeda ay qariyeen haraadi badan oo ah fikrado iyo nidaamyo aan wax xiriir ah la lahayn islaamka iyo nidaamkiisaba, inkastoo ay wali sheeganeyso islaam. Isbeddelkaas ma aha mid dhaw ee wuxuu soo bilawday markii la tuuray khilaafadii raashiddada ahayd. Wax kasta oo meel tuuran (sida ciidda) waxay ku bilawdaan wax yar ilaa ay ka noqdaan qashin weyn oo qariya jihooyinka.

## Marin habowgii "Caalamka Islaamka"

Wax kasta oo isurursada bilow bay lahaayeen. Isbedelka ku yimid nolosha muslimiinta wuxuu soo bilawday markii khilaafadii ku dhisnayd beyca xor ah iyo heshiis ka dhexeeya ummadda

iyo qofka ay dooranayso la tuuray oo lagu beddelay mid qoys ku kooban. Culumaduna way oggolaadeen iyaga oo ka cararaya in fitno ka weyn ka dhalato. Laakiin arrintaas aad bay u saameysay caalamka islaamka, waayo bulshadu waxay u baahan tahay hoggaan dhiifoon, aragti fog, maskax furan, Allaah ka cabsi leh, una taagan waxa ay mas'uulka ka tahay, dadkana ugu yeereyso.

Dhaxal-sugayaashii soo maray taariikhda waxay khilaafadu u timid ayaga oon aan dhaqan islaam lahayn, islaamkana aan u qiiroonayn, dadaalkooduna gaabiyo. Taas waxay muujinaysaa halka uu ka soo jeedo qaybsanka, dhaqanxumada iyo firqooyinka badan ee sameysmay bilowga taariikhdii islaamka. Haddii ay jiri lahaayeen madax sida Cumar (Allah haka raalli noqdee) oo kale ah, oo ahaa daryeele la socda xaaladda ummadda, kana welwelaya baqal ku kuftay Ciraaq in loo qabsado, oo la weydiiyo maxaa dariiqa ugu hagaajin weysay, haddii la heli lahaa madaxdaas oo kale ma dhasheen firqooyinkaas.

Sidee bay ku sameysmeen firqooyin? Sida Muctasila, Ikhwaan Alsafa, faylasoofyo, Jahmiya, Qadariya[11] iyo kuwa kalaba? Sideey ku dhacday in ay firqooyinkaas sameysmaan oo ay yeeshaan taageerayaal iyo awood gaarsiisa in ay qaataan "Xajarul-aswad" lana dhaqaaqaan (muddo dheerna la maqanaadaan)? Ma dhici kartaa sidaas haddii aysan ummaddu ku jirin xaalad maahsanaan iyo hoos u dhac maaddi iyo mid macnawi ah.

Waxaa la hubaa dhaxal sugeyaashu in uu ku yaraa cid u qalanta khilaafada, in kasto oo marar badan ay ka mid ahaayeen rag awood leh; haddana danahooda gaar ah bay wateen.

Tusaale ahaan Al-Muctasim wuxuu ahaa hoggaamiye awood leh oo dulleeyey Roomaanka laakiin haddii uusan boqortooyadiisa daneyneyn kama qayb ahaadeen fidnadii Imaam Axmed Bin Xanbaloo dadka lagu qasbay inay ku mashquulaan mas'aladda "khalqul qur'aan" (in Qur'aanku yahay mid la abuuray). Waxaa ka horreeyey Al-Ma'muun oo ka mid ahaa khulafada cabbaasiyiinta kuwa ugu awoodda badnaa, waxaana ku xigay Al-Muctasim iyo Al-Waathiq[12]. Kuwaas oo idil awood weyn bay lahayeen laakiin waxay ku saamoobeen dhaqankii, falsafaddii Roomaanka iyo Giriigga iyo firqadda Muctasilada.

Dhinaca kale waxaan aragnaa, tusaale ahaan, markii uu yimid Cumar bin Cabulcaziiz in muddo laba sano gudahood ah uu ku beddelay habacii galay dawaladda. Waxaa ka horreyey khulafo xurmo iyo aqoon fiqhi lahaa sida Cabdulmalik Bin Marwaan iyo Suleyman Bin Cabulmalik[13] laakiin ma aysan lahayn ikhlaasnimadadiinta iyo xalaal miiradnimada Cumar oo kale. Ka hor inta uu san Cumar jagada qaban, labadii iswareysataa waxay isweydiin jireen meeqo guri baa dhisatay? immisa addoomo haween ah baa gadatay? xoolo meeqa ayaa shaqeesatay? Laakiin markii uu yimid Cumar wareysigii wuxuu isku beddelay meeqa ayaa tukatay salaatu leylkii? Qur'aanka meeqaa ka xafidday? Ogow waa laba sano gudaheedee!

Cumar arrintaas awood iyo hub midna uma adeegsan ee wuxuu noqday tusaalaha lagu daydo. Farriintii uu u soo diray waaliga Afrika oo uu ku weydiiyey waxa uu ka sameyn lahaa sakooyinka aadka u batay. Cumar wuxuu ku jawaabay addoomo ku xoree. Farriin kale oo uu soo diray jawaabtii Cumar waxay ahayd "ka dhaaf jizyada ahlu kitaabka taagta daran". Haddana maalkii waa badan yahay. Sidee bay arrintaas ku dhacday?

---

[11] Dhamaantood waa firqooyin soo ifbaxay qarniyadii hore ee islaamka, dhamaantoodna waxay la yimaadeen fikrado khaldan oo dhan caqiidada ah oo ay ku khilaafsanyihiin diinta islaamka

[12] Dhamaantood waa khaliifyadii reer bani Cabbaas, ee jiray xilliyadii cabbaasiyiintu xoogga lahaayeen

[13] Dhamaantood waxay ahaayeen khaliifyadii reer bani Umayya, ee qarnigii koowaad ee islaamka joogay

Cumar Bin Cadulcaziz wuxuu u qoray waaliga Masar in uu dhiso guriga digaagga ee ka dumay haween faqiir ah oo cabasho soo gaarsiiasy Cumar ayada oo oranaysa: Cumarow Allaah daryeelkeenna buu ku faray, waana ka seexatay. Cumar ma adeegsanin hub iyo gacan adag balse wuu toosnaaday, kaddibna ummadiina way toostay. Cumar oo sidaa u toosan ayaa wiilkiisu ku eedeynayey gaabisnimo. Arrinku erayo ma aha ee waa dhaqangelin.

Waxaa la sheegay in Cumar la sumeeyey maadaama ay dhibsadeen Yazid iyo walaalkiis Hishaam, kaddib markii uu baytul maalka ku celiyey dhammaan xoolihii reer banii Ummaya, kaddibnadhibaatooyinkii baa iska daba yimid. Xilligii labaad ee cabbaasiyiinta waxaad la yaabaysaa marka aad argato wiil yar oo toddobo jira oo la caleemasaarayo, maamulkana ay isaga cayaarayaan kuwa ka ag dhaw boqortooyada.

Sidaa awgeed waxaan oran karnaa dhibku wuxuu bilawday xilli hore, waxaana suuragal ahayd in dadku u noqdaan sidii hore, waayo waxaa uu sameeyey Mucaawiye (Allah haka raalli noqdee) ma ahayn qaanuun ee waxay ahayd dadaalkiisii iyo cabsidii uu qabay. Waa suuragal falkaas uu sameeyey in uu u helo cudurdaar, Allaahna waa cafin karaa laakiin su’aashu waxay tahay: ilaa maanta muxuu u socdaa habka dhaxaltooyada ah?

Arrintaas waxay keentay in ay kala go’aan ummaddii iyo madaxdeedii, dadkiina wayba iska dhaafeen in ay daneeyaan qaabka doorashada madaxda, taas oo keentay in ay aad u sii kala fogaadaan. Waxaa sii kordhay fasaadkii madaxda, waxaana batay laaluushkii iyo culumadii dhuuni raaca ahayd, sidaas bayna dadkii iyo noloshiiba ku hallaabeen.

Waxaan shaki ku jirin xumahaas isbuuxiyey in uu aad u weynaaday. Xilligaan haddaan dhuganno waxaan arkeynaa in jaahiliyaddu uga faa’ideysatay boogahaas in ay kula dirirto islaamka.

## Waa lama huraan dib u soo nooleynta Islaamka

**(Waxaan la hureyn in la soo nooleeyo ummaddaaku hoos-aasantayafkaar, dhaqamo, iyo xaalado soo jireen ah oo aannan wax xiriir ah la lahayn islaamka iyo manhajkiisaba. Waa sidaas oo ay wali sheeganayso in ay muslim tahay.**

**Waxaan ogahay in masaafo badan u dhexeyso iskudaygaas iyo in la hanto hoggaanka. Waxaa gabi ahaanba meesha ka baxay ummaddii islaamka ahayd, waxaana hoggaankii la wareegay ummado kale oo wata afkaar kala duwan. Reer galbeedku waxay hal-abuureen keyd badan oo aqoon, dhaqan, nidaam iyo wax soosaar maaddi ah, kaas oo dunida muslimka ah ay ka arradan tahay.**

**Si kastaba ha u fogaatee, waa lagama maarmaan in dib loo soo celiyo islaamkii, waayo isku dayga ayaaba ah tallaabada koowaad ee loo baahan yahay in laga gudbo).**

Ma jiro xal aan ka ahayn in dib loo soo celiyo islaamkii, waayo jaahiliyaddu si fudud kuma sii daynayso wixii ay soo ku dhibtootay, waxayna ku qaadaysaa dagaal ciddiyo ku dirir ah qof kasta oo damca in uu burburiyo waxii ay soo saartay. Waa in aan fahamnaa mugga dagaalka. Waxaa kale oo nalaga rabaa in aan garanno -walow aan itaal daran nahay- inaan ka hortegayno ummado, iyo adduunyada oo idil oo haysata keyd dhaqaale iyo awood ciidan. Intaas oo idil waxaa ka hortagaya waa koox yar oo aan haysan iimaankooda maahee wax kale.

Tallaabada ugu horreysa waa in dhidibbada loo taagaa dib u soo noolayntaas. Waxaan ognahay in fikradaha waaweyn uu bilaabay hal qof oo adkeystay ilaa ay noqdeen ummado leh xadaarad.

Ambaqaadkaas islaamkuna wuxuu ka bilaabmayaa qalbiga mu'minka kaas oo ifiya quluubta kale. Taasi waa tallaabada koowad, tallaabo kale oo ka horreysaana amaba lagu beddeli karaana ma jirto.

## Maxay ummaddani ku mudan hoggaaminta Aadanaha?

**(Si uu arrinku noogu caddaado waa in aan si dhab ah u fahmnaa waxa ka dhigaya ummaddaan in ay hoggaamiso bani'aadamka, si aanaan u hareer marinarrimaha looga baahan yahay iskudayga u horreeya.**

**Ummaddaan maanta ma haysato - loogamana fadhiyo -in ay xagga maaddiga ah wax cusub ku soo kordhiso oo dadkoo idil ku tixgeliyaan, dunidana ku hoggaamiso. Arrinkaas reer galbeedka ayaa meel sare ka gaaray, qarniyadaan dhawna ummaddaan loogama fadhiyo in ay meel sare ka gaarto dhinacaas).**

Horumarka nalooga fadhiyo ma aha dhinaca maaddiga ah, in kastoo loo baahan yahay laakiin reer galbeedka ayaa nooga horreeya qarniyo, xataa ma tiigsan karno qarniyo kaddib. Waa in aan raadinaa wax aysan haysan bani'aadamku si aan dadka ugu gudbinno.

**(Waa in la helaa shay kale oo lagu hoggaamiyo bani'aadamaka. Shaygaasi waa "caqiiddada" iyo "manhajka", kaas oo u oggolaanaya in ay haystaan horumarkooda maaddiga ah asaga oo ku dhisan fikrad ka duwan tii hore, waana in caqiiddada iyo manhajkaas uu ku dhaqmo mujtamac muslim ah).**

Bulsho kasta oo aan islaamku isu keenin ma aha bulsho insaani ah. Bulshadaas waxay ka hooseynaysaa xayawaanka. Mujtamac kasta oo jaahili ah lama oran karo waa mujtamacinsaani ah. Arrintaas waxay ka careysiineysaa jaahiliyada. Xataa lama oran karo waa mujtamac xayawaan ah, waayo xayawaanka ayaan meeluga dhacaynaa. Xayawaanku wuxuu gutaa hawshiisa, dhirtuna way gudataa hawsheeda. Jaahiliyadu ma gaarin heerkaas waayowaa mujtamacdoorsoon oo aan insaani ahayn.

Bulshada bani'aadamka ee dhabta ah waa bulshada islaamka ah. **(Waxaan ognahay in caalamku uu maanta dhammaantiis uu ku jiro jaaahiliyad)**

Sayidku oo fahamsanaa waxa uu qorayo, mujtamac gaar ah kama reebin, waxaana la hubaa in uu ka reebi lahaa haddii ay jirto goob aan jahiliyad ahayn.

**(Dunida maanta idilkeed waxay ku nooshahay jaahiliyad marka laga fiiriyo gunta hoose oo ay noloshoodu ku dhisan tahay. Horumarka maaddiga ah iyo halabuurka sare oo ay gaaraty kama fududeyn karo jaahilyadda ay ku jirto, maadamo asal ahaanba ay ku dhisan tahay in ay ku xadgudubtay talada(suldaanka) Allaah).**

Dunida maanta dhamaanteed waxay ku nooshahay jaahiliyad, waxaana ka mid ah astaamaha jaahiliyada in ay hoos u dhigto sharafta Allaah siiyey dadka; waayo marka ay maamulka Allaah ku xadgudubto waxay isla markaasna u addoominaysaa dadka cid aan Allaah ahayn, qiimahoodana hoosbay u dhigaysaa.

Halkan waa meesha u islaamku la gaar yahay maadaama uu yahay manhajka kaliya ee sharfaya bani'aadamka

﴿ وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي آدَمَ وَحَمَلْنَاهُمْ فِي الْبَرِّ وَالْبَحْرِ ﴾ [سورة الإسراء: ٧٠]

"Waan karaameynay bani'aadamka, waxaan ku xambaarnay barriga iyo badda" (Al-Israa: 70)

Dareenka uu qabo qofka muslimka ah, oo ah in uu haysto manhaj u ilaalinaaya sharaftiisa, waa dareen siinaya kalsooni, milgo iyo sharaf. Macnaheeduna ma aha qab iyo islaweyni.Way kala duwan yihiin "islaweyni" iyo "isla sarreyn iimaan" sida ay u kala duwan yihiin kalsooni iyo kibir.

Waa in aan ogaannaa in aan xaq ku taaganahay, kibirna uusan na galin sidii kaniisaddu sameysay oo kale. Dareenkaas kalsoonida iyo ka gaar ahaanshuhu waa in uusan nagu dhalin inaan dadka iskala weynaanno. Arrinkaan waa dhabbaha ay ku kala leexdeen islaamka iyo manhajka jaahilyada. Islaamku wuxuu ka xoreynayaa bani'aadmka in cid aan Allaah ahayn ay addoon u noqdaan, laakiin jaahilyadu waxay dadka ka dhigaysaa kuwa addoomo u ah ilaahyo la dhoodhoobay. Taariikhda bani'aadamka ilaa maanta la joogo waxaad ku arkeysaa dad caabudaya dad kale ama xayawaanka sida lo'da.

Islaamku wuxuu ka xoreynayaa bani'aadmkainay caabudaan cid aan Allaah ahayn, laakiin jaahilyadu bani'aadamka waxay u addominayasaa cid kasta oo aan Allaah ahayn, taasina waa kalabayrka loo baahan yahay in la fahmo oo aan wax gorgortan ah laga galin iyo in meel dhexe la isugu yimaadaba.

Dhabtii way jiraan dad oranaya: Allaah baan caabudnaa, waa tukannaa, waana soonnaa, masaajidkana waa aadnaa, balse su'aashu waa: maxaad ku sameysaa nolosha inteeda kale? Intaa kaddib sharciga waxay ka qaadanyaan bani'aadam, wixii san iyo wixii xun waxay ka soo xiganayaan bani'aadam, xiriirka noloshooda waxaa maareeya qawaaniin bai'aadam dajiyey. Waxay maamulkii u kala qaybiyeen Allaah iyo bani'aadamka, waxayna ka dhigeen ilaahnimada mid wadaag ah oo dhextaal Allaah iyo bani'aadamka. Arrinkaas waa shirki weyn oo Allaah uusan aqbalin camal shirkigaas oo jira.

Allaah wuxuu ku leeyahay (Xadiith Qudsi):

( أنا أغنى الشركاء عن الشرك ، فمن عمل عملاً أشرك فيه معي غيري فهو للذي أشرك وأنا منه برئ ) [١٤]

"Waxaan ahay kan ugu deeqtoon kuwa wax wadaaga waxa la wadaajiyo, qofkii sameeya fal uu ila wadaajiyey cid kale, falkaa waxaa yeelanaya kii uu ila wadaajiyey, anigana beri baan ka ahay".

Waxaa kale oo Allaah yiri:

( إن الله لا يغفر أن يشرك به ... )

"Allaah ma dhaafo in wax lala wadaajiyo (shariik loo yeelo)".

Qofkii Allaah wax la waadjiya ma noqonaya addoon Allaah ee waa mushrik. Mar hadduu mushrik noqdayna kala tage isaga iyo addoonnimo, haba sheegtee in uu Allaah yaqaan, haba cibaadaysto, Allaahnahaka qaato wax ka mid ah arrimaha qoyska. Allaah waxna kama aqbalayo, wuxuuna ka eryayaa naxariistiisa illeen ilaahyo kale buu Allaah la wadaajiyey.

## Hawsha ugu horreysa ee dib usoo noolaynta Islaamka

Halkaan waxaan ka fahmeynaa xilka gaarka ah ee u yaalla muslimiinta ama kuwa islaamka dib u soo nooleeynaya, xilkaas waa gaarsiinta dadka diinta xaqa ah. Waa hawsha kaliya ee noo

[١٤] رواه مسلم من حديث أبي هريرة ﷺ .

taalla, loona baahneyn in mid kale loo hanqal taago. Hawsheennu ma aha in aan ku takhasusno fiqi ama naxwe (sida saybaweyh), ama aa ku xeel dheeranno usuulul-fiqi ama fisikis ama kimistari. Waa u baahan nahay in aan wax ka naqaan kuwaas aan soo sheegnay laakiin ma aha hawshii gaarka ahayd ee noo taallay. Kaba soo qaad in aan kulligeen ku haysanno shahaadooyin diktooraa ah dhinaca fiqiga iyo usuushiisa, tafsiirka iyo naxwaha, waxaa dhooban kumanaan azhariyiin ah oo shahaadooyinkaas wata, haddaba maxaan uga duwan nahay ama uga soocannahay? Haddii kulligeen aan ku noqonno khubaro xagga kimikada, fiskiska am caafimaadka waxaa dhooban kumaanaan bari iyo galbeed ah oo wata shahaadooyinkaas oo kale, oo annaga aan ardey u noqonaynno. Haddaba taas ma hawsheennibaa? Ma takhasuskeennibaa? Takhasuskeennu waa in dadka aan ugu yeerno xaqiidada diinta oo wixii hawshaas naga fogeynaya aan la iskuba dayin.

Haddii nala weydiiyo naxwe, fiqi, usuul fiqi, xisaab ama kimistari jawaabteennu waa: yaa idin ku yiri arrimaas bay culumo ku yihiin? Annagu hal shay kaliya ayaan idiinku yeereynaa oo ah in Allaah yahay Allaha kaliya ee shay kasta maamula, waxaana idin ka rabnaa inaad soo hoos gashaan maamulka Allaah, kana baxdaan maamulka addoomada. Arrintu waa fududdahay ee qaataama diida. Maxaa keenay dagaalka, ciqaabta iyo xabsiga aad nagu haysaan.

Haddii aan garanno hawsha noo taal oo aan fahamno muggeeda waxaan noqonaynaa kuwo itaal iyo sharfba leh, suuragalna ma noqonayso in dhabbaahaas weyn nalaga leexiyo oo surimo yar yar oo soo oodmaya nala marsiiyo. Waa in aan bannaankaas weyn oo waasaca ah marnaa annagoo sarreynna. Waxaa dhici karta in nala dilo, waxaan leenahay markaa “soo dhawow shahiidnimoy”, oo ay la mid noqoto oraahdii saxaabiga markii uu ku dhacay gammuunku ee uu yiri” Kacbada Rabbigeedaan ku dhaartayee waan liibaanay”. Taas oo saameysay kii dilay oo ku bixisay in uu islaamo. Arrintu agtayada sidaas bay u muuqataa una caddahay.

Kaddib Sayid Qudub wuxuu yiri isaga oo ay ka muuqato isku kalsooni iyo yaqiin sare **(Waxaa hubaal ah in aan haysanno shay aad u cusub oo uusan bani’aadamku soo saari karin, aqoonna u lahayn).** Yaqiintas iyo iskukalsoonidaas waa midda la rabo in ay buuxiso quluubteenna. Qofka muslimka ah amaba daaciga ah wuxuu ka dheregsan yahay yaqiin iyo kalsooni uu ku qabo xaqa, sidaa awgeed ma gabi dhacleeyo mana hakado marka uu xaqa soo bandhigayo, lagumana dhaco in gorgortan iyo sasabasho lagu dayo balse wuxuu go’aan cad ku qaatay in uu haysto shay cusub oo aysan bani’aadamku aqoon, sameysanna karin.

Hadalkaas Sayidku wuxuu galinayaa nafta qofka muslimka ah dareen sare, xagga cilmiga, kalsoonidaiyo ku faraxsanaanta xaqan iyo in uu u babacdhigo jaahiliyadda. Wuxuuna xasuusinyaa mawqifkii uu istaagay Nabi Nuux sida Qur’aanka ku timid:

﴿ وَاتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ نُوحٍ إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ يَا قَوْمِ إِنْ كَانَ كَبُرَ عَلَيْكُمْ مَقَامِي وَتَذْكِيرِي بِآيَاتِ اللَّهِ فَعَلَى اللَّهِ تَوَكَّلْتُ فَأَجْمِعُوا أَمْرَكُمْ وَشُرَكَاءَكُمْ ثُمَّ لَا يَكُنْ أَمْرُكُمْ عَلَيْكُمْ غُمَّةً ثُمَّ اقْضُوا إِلَيَّ وَلَا تُنْظِرُونِ ﴾ [يونس: ٧١]

“Waxaad ku akhrisaa korkooda khabarkii Nabi Nuux markii uu ku yiri qoomkiisa: qoomkeygiiyow hadday idin la weynaaytaynagaadigeyga iyo xusuusintayda aayadaha Allaah, Allaah ayaan talo saartay ee meel isugu geeya taladiinna iyo tan shurakadiinna, arrinkuna yuusan madow idinka galin ee i xukuma hana ii sugina” (Yuunis: 71).

Waa kalsooni, deggenaan iyo u babacdhigid meesha u sarreysa, waana midda laga rabo ducaadda diintan, deggenaan aan shaki lahayn. Baahi looma qabo dood, loomana baahna culumada dawladdu in ay islaamka na baraan. Haddii ay noo yimaadaan hadalkeennu waa: Idinku nama bareysaan islaamka, waxaad moog tihiin xaqiiqada islaamka.

Waxaa taqaannaan fiqiga najaasada iyo dahaarada laakiin ma garaneysaan macnaha kalimadda tawxiidka. Qiimaha arrinkaas waa moog tihiin, oggolaada ama ha oggolaanina, qaata ama diida, doodduna waa xiran tahay. Nama dhibayso in ay yiraahdaan waa jaahiliin iyo moogayaal. Annagu waxaan akhrinnay kitaabka Allaah iyo siiradii Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee), waxaanna aragnay sida ay nabiyadii Allaah diintaan ula dhaqaaqeen. Arrinkaas cilmi weyn baan u leennahay, daliilkeenuna waa cad yahay, kitaabkeennuna waa ifayaa. Yaqiintaas baan uga hortagi karnaa jaahiliyadda.

## Goobtee laga bilaabaa?

**(Waxaan hubnaa in aan haynno shay cusub oo aysan jaahiliyadu horey u aqoon, sameynna karin!) … (Laakiin shaygaas cusub sidii aan hore u soo sheegnay waa in loo beddelaa dhaqan ummadeed, waana midda keenaysa dib u soo nooleynta ka billaabato dhulka islaamku xukumi jiray).**

Maxaa loo doortay dhulkii uu islaamku ka talin jiray? Waayo waxaa laga helaa ummadda halkaas daggan arrimo la wadaago oo la isla fahmi karo. Waxay rumeysan yihiin in Qur'aanku yahay kitaabkii Allaah, Nabi Muxamadna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee) yahay Rasuulkii lagu khatimay rususha. Waxay kaloo rumeysan yihiin in Allaah kaligiis yahay ilaah, uuna yahay Allaha wax abuuray, wax arsuqa, dhib iyo dheefba haya. Taasi waa saldhig la wadaago, loogana ambaqaadi karo bilawga dacwada.

Taas macnaheedu ma ahan in dadka kale aan waxba loo sheegeyn. Waddamada "islaamku ka talin jiray" maadaama ay taariikh hore leeyihiin, waxay noqon karaan goob looga ambaqaado dacwada la rabo in dib loogu soo nooleeyo islaamka.

**(Sidee bay hawshaas dib usoo noolaynta ah loo bilaabi karaa? Waa in la helaa horseedayaal go'aan adag leh oo ku dhaqaaqda dariiqa).**

Fikrad kasta waa in qof uu qaataa, qofkaas dad ugu yeeraa, la qiiroodaa, daacadna u ahaadaa, dhaqan geliyaa, kana muqataa noloshiisa.

﴿ فَإِذَا عَزَمْتَ فَتَوَكَّلْ عَلَى اللَّهِ ﴾ [آل عمران: ١٥٩]

"Haddii aad go'aansato Allaah talada saaro" (Ala Cimraan: 159)

go'aan qaadashadu waa tallaabada ugu dambaysa fulinta ka hor.

**(Waa in la helaa horseedayaal go'aan leh, horey u dhaqaaqa ayaga oo dhexjibaaxaya jaahiliyadda dhooban meel kasta, ayaga oo dhinacna xiriir kala leh, dhinaca kalana gooni uga soocan)**

Marka horsedayaasha bilaabaan in ay aaminaan xaqa, tallabooyinkooda ugu horreeyana qaadaan, durbadii waxaa imaanaya dareen soocnaan ah. Ma aha dareenkaas mid iska yeelyeel ah ee waa mid ka dhalanaya xaqa ay wataan iyo sida loogu dabbaqayo nolosha. Isla markiiba waxaan arkeynaa annaga iyo qoomkeennii oo laba diin kala wata. Waana marka uu dhacayo dareenka kala soocnaanta ah. Waxaa noo soo baxday in aannaan ka mid ahayn ummaddaas. Meel aan iskaga mid nahay ma jirto ha noqoto xagga fekerka, yididiilada, dareenka iyo xataa waqtigeenna sida aynu u adeegsanno (nasiino ama wax qabsasho). Xiriirkii waa go'ay, ummad gaar u taagan baan noqonnay.

Soocnaantu ma aha mid iska yeelyeel ah. Waa in uu dib isugu noqdaa qof kasta oo xaqaan qaata oo dareenkaas aan dareemin. Soocnaantaashadduusan dareeminwaa in uu hubiyaa in xaqii uu fahmay, qalbigiisana galay. Haddii xaqaas uu si sax ah u qaado marinkiisa, oo uu galo dhiiggeenna, dareenkeenna iyo qanacsananteenna, waxaan durbadiiba dareemeynaa soocnaantaas, mana aha in gabi ahaanba gaar loo baxay. Waxaa jiraya dhinac xiriir ah iyo dhinac kale oo soocnaan ah. Waxaa jaahiliyadanaga dhexeeya ganacsi, xiriir, darisnimo, kulan iyo waxbarsho.

Waxaan ku dhex noolnahay oo aan la dhaqmaynnaa jaahiliyo, waana in la ogaado inay jaahiliyadu tahay cidda dacwada loogu yeerayo. Waana inay naga dhexayso xiriirro, ee ma aha inaan bohollo iyo lama-dagaan u guurno, waa inaan ku dhex noolaanno, waana sidii uu yeelay nabi Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee). Nabigu dadka wuu la dhaqmayay, diinta ayuu ugu yeeayay, saaxiibtinimo baa kala dhaxaysay, wax bay ku amaanaysan jireen, intaasoo dhan isaga oo xaqa qalbigiisa ku haysta, kuna adkaysanaya.

Markii ay horseedayaashaas go’aansadaan in ay dhabbaha ku dhaqaajiyaan, dareenkooda ay gaar ula baxaan ayaga oo la macaamilaya jaahiliyadda, markaas waxay u baahan doonaan tusmooyinka dhabbaha. Waxaan sharxi doonnaa sida ay ula dhaqmi doonaan, maxay ku wada macaamili doonaan, waa maxay qawaaniinta xukunta qiyamkaiyo ahdaafta macaamilkooda, sidee bay u dhaqangelin karaan dareenkooda gaar isu-taagga ah. Arrimahaasi waa nuxurka kitaabka.

## Tusmooyinka dhabbaha dib u soo nooleynta Islaamka

**(Waa in horseedayaasha go’aankaas gaaray ay helaan tusmooyinka dariiqa, kuwaas oo ay ku gartaan dowrkooda, waxaana ka mid ah:)**

Tusmada 1aad: Tusmada ugu horreysa oo la rabo waa **in ay gartaan in dowrkoodu yahay hoggaamin;** hoggaaminta bani’aadamka loo wado xagga Allaah iyo hanuunka. Waa in ay gartaan in xil culus dusha loo saaray oo aysan yaraysan marnaba. Waa in ay ka buuxdaa kalsooni iyo yaqiin hawsha loo dhiibay weyninkeeda:

﴿ كُنْتُمْ خَيْرَ أُمَّةٍ أُخْرِجَتْ لِلنَّاسِ ﴾ [آل عمران: ١١٠]

“Waxaad ahaateen ummad midda ugu kheyrka badan ee la soo saaray…” (Ala-Cimraan: 110).

﴿ وَلْتَكُنْ مِنْكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى الْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِالْمَعْرُوفِ ﴾ [آل عمران: ١٠٤]

“Ha idin ka mid ahaadaan ummad xaqa dadka ugu yeerta, samahana farta” (Ala-Cimran: 104).

Waa in qofku yaqiinsadaa in xil culus uu sido. Waa laga yaabaa in uu qofku isu arko qof basiid ah, qofaan qiimo badan lahayn, laakiin maadaamo Allaah uu hawl u xilsaaray waa in uu masuuliyaddaa qaadaa, aqbalaana deeqdaa Allaah uu u doortay isaga oo jaahiliyadda ku dhex jira oo ah in uu ku shaqeeyo dariiqii anbiyada (الله أعلم حيث يجعل رسالته) (Allaah uun baa garan og halka uu dhigayo risaladiisa). Ha u hinqado xilka, dhabarkana ha u rito wixii ka dhasha, Allaahna ha weydiisto kaalmo iyo garab. Ma jabto ciddii Allaah garabsata, mana dayacanto ciddii Allaah magansata.

Tusmada 2aad: Waa in horseedayaashugartaan **in shaqadoodu tahay inay xaqa gaarsiiyaan** iskuna dayaan hanuuninta dadka. Tani waa hawl weyn oo uu qofku sameeynayo, waana hawshii nabiyada. Hawsheennu waa in aan xaqa dadka gaarsiinno. Culumaduna waa kuwii

dhaxlay nabiyada. Waa in aan fahamnaa in ay hawshaan tahay hawl weyn taas oo macnaheedu yahay in aan bixinno dadaal laballaab ah, awooddeenna oo dhanna isugu geynno. Dadnimo iyo daw midna maaha in aan hawshaas siinno haraaga waqtigeenna, iyo hambada kartideenna iyo awooddeenna. Taas ma aha caddaalad iyo dadnimo midna. Waa in aan siinnaa waqtigeenna iyo dadaalkeena kan ugu qaalisan.

Tusmada 3aad: Waa in ay gartaan **nuxurka ujeedadooda oo ah addoon u noqoshada Allaah**. Ma ihin dad xukun doonaya, maal raba, sharaf raadinaya ama jago doon ah. Arrimahaas oo idil midna uma hanqal taageynno. Waxaa suurowda in nolol iyo geeri cidiba na ogaan. Waxaan doonaynaa oo kaliya in aan Rabbi addoomou noqonno. Taas oo ah inaanhawadeenna raacinin wax uusan Allaah dooneyn waayo taas la'aanteeda iimaanba ma jiro. Rasuulku (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee) wuxuu yiri

( لا يؤمن أحدكم حتى يكون هواه تبعاً لما جئت به ) [١٥]

(Midkiinna iimaan lagama helin ilaa hawadiisu noqoto mid raacsan wixii aan la imid).

Taas waa addoonimada fiidddeeda sare, waa meel sare oo tiigsi mudan. Waxaa nalooga baahan yahay inaan aad u dhibtoonno sidii aan ku fanan (fuuli) lahayn buurta dusheeda oo ah in rabitaankeennu yahay raacitaanka Rasuulka (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha noqotee). Sidee ku gaarnaa buurta fiiddeeda sare? Taas waxay u baahan tahay dadaal aysan la socon hurdo iyo cayaar cayaar. Waxaa habboon in aan garanno hadafka weyn ee uu u baahan dadaalkaas. Tusmada saddexaad waa in ay gartaan nuxurka ujeeddada oo ah addoon u noqoshada Allaah iyo wixii looga baahan yahay oo tilmaamo ah.

Tusmada 4aad: Waa **in ay fahmaan halka laga bilaabayo** safarka dheer in ay tahay caqiiddada oo ah in markasta laga bilaabo qaddiyadda "Laailaha illalaah"

Tusmada 5aad: Waa in ay fahmaan **(mowqifka ay ka istaagi lahaayeen jaahilyadda dhulka buuxisay)** oo ah in ay ka soocnaadaan, gaarna ka ahaadaan.

Tusmada 6aad: Waa in ay gartaan **(maxay wadaagaan dadka, maxayna ku kala duwan yihiin)** waa qaddiyadda "Alwalaa wal baraa". Waana in ay garanayaan sida ay ula dhaqmayaan, oo wax u jeclaanayaan? Bartee ku kulmi karaan ama ku kala tegi karaan? Arrimahaas oo idil ayaa saldhig u ah oo xaddidaya "Alwalaa wal baraa".

Tusmada 7aad: Waa maxay **(tilmaamaha u gaarka iyaga iyo kuwajaahiliyadda)** waana waxa ka jira waaqaca nolosha. Waxaa lama huraan u ah horseedayaashu in ay fahmaan waaqaca ay ku nool yihiin, astaamahooda iyo kuwa jaahiliyadda hareeraheeda ah. Waana in ay xaddidaan inta ay isu jiri karaan ayaga iyo jaahiliyadda, waana meesha go'aaminaysa barta bilowga

Tusmada 8aad: Waa in ay gartaan **(qaabka ay ula hadlayaan jaahiliyadda iyo waxa ay u sheegayaan)** waana manhajka. Waa lama huraan in ay gartaan sida ay jaahiliyadda ula hadlayaan. Hadal kasta kuma habboona, bilow kastana sax ma ha, dariiq kastana kuma gaarsiinayo sida ay jaahilyaddu u fahmi lahayd waxa aan ugu yeereynno. Taasna waa midda ay ku kala tageen xarakaadka islaamka.

Tusmada 9aad: **(Waa in ay gartaan xaggee wax ka qaadanayaan, sideena wax u qaadanayaan).** Taas waxay xaddideysaa manhajka waxqaadashada oo aad muhiim u ah.

[١٥] أخرجه الحسن بن سفيان وقال ابن حجر: رجاله ثقات ، وصححه النووي في الأربعين النووية .

Tusmada 10aad: Waa in ay gartaan **(aragtidii islaaamku ku dhisay asxaabtii xulka ahayd, kuwaas oo Allaah ku beddelay socodka taariikhda aadanaha, kuna hirgeliyey gacantooda guushii Islaamka).** Asxaabtu waxay ahaayeen dhaqangelintii runta ahayd ee Islaamka.Bal aan fiirinno siday arrintaas ku timid iyo sida ay ku hirgashay?

Bal aan fiirinno Cumarkii qalafsanaa, ad-adkaa, dilaaga ahaa, islaweynida badnaa xilligiisii jaahiliyadda, sidee buu isugu beddelay hoggaamiye naxariis badan ahna caalim mulham ah? Khaalid bin Waliidkii cadowga islaamka ahaa, sidee buu isugu beddelay seeftii Allaah ee galka ka siibneyd? Sidee buu Almuqiira bin Shucbihii jidgooyaha ahaa isugu beddelay xiddig ka mid ah xiddigihii bulshada islaamka? Sidee buu islaamku u noqdaytusaale nool oo lagu dayan karo?

Waxaa jira fikrado fiican oo laga qaadan karo xarakaadka islaamiga. Tusaale ahaan Akhwaanka waxay yiraahdaan qof kasta ha fiiriyo dhiggiisa asxaabta ku jira, hana isku dayo in uu ku daydo. Ka soo qaad haddii qofkaas uu yahay mid dabeecad deggan, jecel cibaadada, ha raadsado saxaabiga tilmaamahaas oo kale leh, ha fiiriyo sida saxaabigaas uu kula halgamay naftiisa iyo shaydaankaba. Qofkii kulul oo xanaaq badan oo aan deggenayn ha fiiriyo Cumar Allah haka raalli noqdee si uu u ogaado qaabka uu isaga beddelay qalafsanaantii iyo ad-adeygii, una noqday mid u naxariista muslimiinta. Taasi waa fikrad wanaagsan oo aan ka shidaal qaadan karno. Qof kasta oo naga mid ahi waa in uu raadiyaa saxaabi uu ku daydo annaga oo ku dhisayna in asxaabtu ay ahaayeen bani’aadam. Waxaa nagu adag in aan gaarno heerkii uu Rasuulku gaaray waayo nabigu waa macsuum. Laakiin waxaan awoodnaa in aan isweydiinno maxaan u noqon weynay Cumar oo kale? Cabdiraxman bin Coof oo kale? Cali oo kale? Maxamed bin Maslama oo kale? Abuu Saciid Alkhudari oo kale? Dhamaantood Allah haka raalli noqdee. Waa in qofku isku dayaa sida ay asxaabtaas ula dhaqmeen naftooda oo u gaareen fiidda sare.

Tusmooyinkaas tobanka ah waa udub dhexaadka kitaabkan. Inta aan kitaabkan daraaseyneyno waxaan baari doonnaa tilmaamaha looga baahan yahay hoggaaminta iyo hababka gaarsiinta xaqa. Waxaan kaloo ka hadli doonnaa macnaha addoonnimo iyo waxa ay wadato, caqiiddada iyo sida loo bilaabayo, loona sharxayo.

Waxaan kaloo qeexi doonnaa macnaha laga wado “soocmid” iyo waaqaca hareeraheenna ah. Waxaan lafa guri doonnaa manhaj aan rabno inaan xaqa ku gaarsiinno dadka iyo halka aan ka soo qaadaneyno manhajkaas, muxuu noqonayaa xiriirka “alwalaa wal baraa” ee aan la yeelanayno jaahiliyadda, iyo yaan ka dhiganaynaa tusaalaha laga qaadan karo ku dabdaqidda diinta nolosheenna.

Dhamaad!